LOO-SHAQEEYAYAASHU WAA INAY OGEYSIISKAN KU DHEJIYAAN MEEL AY SHAQAALUHU KA AKHRISAN KARAAN

XUQUUQDA SHAQAALAHA MARKA SARAAKIISHA FEDERAALKA EE SOCDAALKA SAMEEYAAN KORMEERKA I-9 EE GOOBTA SHAQADA

The Immigrant Worker Protection Act (IWPA, Xeerka Ilaalinta Shaqaalaha Muhaajiriinta) waa sharci ka jira gobolka Washington kaas oo waajibka ah in loo shaqeeyahaaga uu ku ogeysiiyo marka wakiillada socdaalka federaalka ay sameeyaan kormeerka I-9 ee ganacsiga ama goobta shaqada. Kormeerka I-9 waa marka wakiilada socdaalka federaalka, oo ay ku jiraan Immigration and Customs Enforcement (ICE, Hay'adda Dhaqangelinta Shuruucda Socdaalka iyo Kastamka) ay baaraan haddii loo shaqeeyuhu si sax ah u dhammaystiray I-9s.

QOF KASTA WUXUU IIMAYL U DIRI KARAA AMA WICI KARAA WASHINGTON STATE ATTORNEY GENERAL'S OFFICE (XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE GOBOLKA WASHINGTON) SI UU WAX BADAN U OGAADO, LA WADAAGO WALAACYADA, AMA UU SOO SHEEGO XADGUDUBYO SUURTAGAL AH.

IWPA@atg.wa.gov

(206) 254-4270

IWPA waxay loo-shaqeeyayaasha kaga baahan tahay inay sameeyaan laba arrimood:

1. Shan maalmood oo shaqo gudahood kadib markii la helo ogeysiis ka socda hay'ad federaal ah oo ku saabsan kormeerka I-9s iyo diiwaanada shaqaalaha la xiriira, loo-shaqeeyayaashu waa inay si toos ah ugu ogeysiiyaan shaqaalahooda (iyo ururkooda shaqaalaha ama wakiilkooda wadaxaajoodka kooxeed, haddii uu jiro) kormeerka isla markaana ogeysiiska kormeerka ku dhejiyaan meel ay dhammaan shaqaaluhu arki karaan.

I W P A

2. Shan maalmood oo shaqo gudahood laga bilaabo marka la helo natiijooyinka baaritaanka foomamka I-9 ee hay'ad federaal ah, ogeysii shaqaale kasta oo ay natiijooyinku saameeyeen (iyo ururka shaqaalaha ee uu ka tirsan yahay ama wakiilkiisa gorgortanka wadajirka ah, haddii uu jiro), haddii baaritaanku muujiyey khaladaad ku jira foomamka oggolaanshaha shaqada ee shaqaalahaas ama lagu ogaaday in shaqaaluhu aanu haysan oggolaansho shaqo. U sharax muddada loo qabtay in khaladka lagu saxo, una soo bandhig fursad ay kula kulmaan adiga, iyaga iyo ururka shaqaalaha ee ay ka tirsan yihiin ama wakiilladooda gorgortanka wadajirka ah.

Shuruudaha ogeysiiska buuxa ee sharciga waxaa laga heli karaa Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo muraajiciyay ee Washington) 49.97.050 iyo 49.97.060

Haddii la sameeyo kormeer I-9, loo-shaqeeyaha wuxuu ogeysiin doonaa shaqaale kasta oo ku saabsan kormeerka I-9 iyada oo loo marayo (☐ qoraal / ☐ iimayl / ☐ gacan ku geyn / ☐ wax kale) isla markaana ogeysiisyada kormeer kasta oo I-9 ah ku dhejin doonaa goobta(aha) soo socda:

_____

_____

Haddii kormeerka I-9 uu ogaado cillado, loo-shaqeeyahan wuxuu ogeysiin doonaa shaqaale kasta oo qalad ku dhacay (☐ qoraal / ☐ iimayl / ☐ gacan ku geyn / ☐ wax kale) wuxuuna siiyaa shaqaalaha fursad uu kula kulmo loo-shaqeeyaha oo uu sameeyo wixii saxitaano ah.

Boorkan waxaa bixiyey Washington State Attorney General's Office, iyadoo la raacayo qodobka RCW 49.97
Nooca 1 (09/2026)

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

Waa maxay kormeerka I-9?

I-9 waa foomka dowladda federaalka. Loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha cusub waa inay buuxiyaan si ay u caddeeyaan aqoonsiga shaqaaluhu iyo in loo oggol yahay inay ka shaqeeyaan Maraykanka. Tilmaamaha foomka I-9 wuxuu taxayaa dukumiintiyada ay shaqaaluhu isticmaali karaan si ay u muujiyaan in loo oggol yahay inay shaqeeyaan. Loo-shaqeeyayaashu ma qasbi karaan shaqaalaha inay muujiyaan dukumiintiyo gaar ah si ay u buuxiyaan I-9. Shaqaaleysiiyayaashu waa inay haystaan foomka I-9s ee shaqaale kasta oo hadda jooga. Marka shaqaale uu shaqada ka tago, loo-shaqeeyuhu waa inuu hayaa Foomka I-9 muddo 3 sano ah laga bilaabo taariikhda shaqaalaysiinta ama 1 sano laga bilaabo maalintii ugu dambaysay ee shaqaaluhu shaqeeyay, hadba muddada dambe ku eg. Loo-shaqeeyayaashu waa inay go'aansadaan inay haystaan nuqullo ka mid ah dukumiintiyada gaarka ah ee shaqaaluhu u isticmaalaan buuxinta Foomka I-9. Isticmaal isla xeerkaas mar kasta si aad u haysato nuqullo ka mid ah aqoonsiga shaqaalaha ama dukumiintiyada oggolaanshaha shaqo. Loo-shaqeeyayaasha isticmaala E-Verify waa inay raacaan xeerarka E-Verify ee lagu haysto diiwaanada.

Wakiilada socdaalka federaalka waxay bilaabi karaan kormeerka I-9 iyagoo diraya Notice of Inspection (Ogeysiiska Kormeerka). Ogeysiisku wuxuu loo shaqeeyayaasha ka codsanayaa foomka I-9 ee shaqaale kasta. Waxay sidoo kale weydiisan kartaa diiwaanno kale, sida dukumiintiyada mushaharka.

Marka loo-shaqeeyuhu helo Ogeysiiska Kormeerka (Notice of Inspection), wuxuu haystaa 3 maalmood oo shaqo si uu u soo gudbiyo foomamka I-9 iyo dukumiintiyada kale ee loo baahan yahay.

Muxuu shaqaale sameyn kara haddii loo-shaqeeyuhu uusan u sheegin in baaritaanka I-9 la qabtay?

Xaalado qaar, haddii loo-shaqeeyuhu uusan shaqaale u sheegin kormeerka I-9, shaqaaluhu wuu dacweyn karaa. Way dacweyn karaan si ay u joojiyaan in mar kale aysan dhicin, lacag u helaan waxyeello, dabooli karaan khidmadaha qareenka, ama codsan karaan caawimaad kale.

Washington State Attorney General (Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington) wuxuu sidoo kale baari karaa xadgudubyada, wuxuuna dhaqangelin karaa Immigrant Worker Protection Act. Haddii shaqaaluhu uu u maleeyo in loo-shaqeeyahiisu jebiyay sharciga, wuxuu u sheegi karaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud isagoo iimayl u diraya: IWPA@atg.wa.gov.

Loo shaqeeyuhu ma iga aargudan karaa sababo la xiriira inaan soo sheegay jebinta Immigrant Worker Protection Act?

Loo-shaqeeyuhu ma ciqaabi karo shaqaale isticmaalaya xuquuqdiisa hoos yimaada Immigrant Worker Protection Act. Tusaalooyinka xuquuqdan waxaa ka mid ah warbixinta xadgudubka ama ka caawinta baaritaanka. Haddii shaqaaluhu adeegsado xuquuqdiisa, loo-shaqeeyuhu uguma isticmaali karo xaqiiqdaas dib u eegisyo, dallacsiin, shaqo ka ceyrin, ama anshax marin. Laakiin loo shaqeeyuhu weli wuu qaadi karaa tallaabo haddii sharciga gobolka ama federaalku ku waajibiyo, tusaale ahaan, haddii shaqaalaha aan loo oggolayn inuu shaqeeyo sida uu qabo sharciga federaalka, shaqada waa laga eryi karaa.

Haddii shaqaaluhu ay qabaan su'aalo sharci oo ku saabsan xaaladdooda, waa inay la hadlaan qareen. Haddii aad u baahan tahay talo ama aad qabto su'aalo ku saabsan habka kormeerka I-9, macluumaadka hoose ayaa laga yaabaa inuu kaa caawiyo:

- **Deportation Defense Hotline (Khadka Ka Hortagga Masaafurinta) ee Washington Immigrant Solidarity Network (WAISN, Shabakadda Garab Istaagga Dadka Soo-galootiga ee Washington):** 1-844-724-3737. Saacadaha: Isniin ilaa Jimce, 6am ilaa 6pm. Turjumaad ayaa laga heli karaa ku dhawaad 300 luqadood. Macluumaadka Know Your Rights (Garo Xuquuqahaaga), tixraacyada sharciga iyo illaha, wixii wehliya. https://waisn.org/what-we-do/deportation-defense/hotline/
- **Northwest Immigrant Rights Project (NWIRP, Mashruuca Xuquuqda Dadka Soo-galootiga ee Waqooyiga Galbeed)** waxay bixisaa adeegyo sharci iyo u-doodista xuquuqda muhaajiriinta ku nool gobolka Washington. Waxaa lagala xiriiri karaa iimayl ahaan iimaylka: info@nwirp.org. Si aad u hesho caawimaad dheeraad ah oo ka timid NWIRP, fadlan booqo: https://www.nwirp.org/get-help/
- **Ururo iyo illooyin dheeraad ah** waxaa laga heli karaa: https://atg.wa.gov/iwpa

Boorkan waxaa bixiyey Washington State Attorney General's Office, iyadoo la raacayo qodobka RCW 49.97
Nooca 1 (09/2026)